

## Ma ogtahay?

- Aydhisku waa cudur weerara nidaamka difaaca jirkeenna, kaas oo ka dhasha feeyraska loo yaqaanno feeyraska dacifiyaha ama fashiliyaha nidaamka difaaca jirka banu'aadamka (HIV).
- Aydhiska waa la daweyya laakin lagama bogsado/ lagama fayoobaado : daawooyin cusub oo culayskodu yar yahay ayaa jira taa oo u ogolaaneysa qofka xambaarsan cudurka aydhiska inuu dhimo awoodda feeyraska oo ka dhigaysa markaa mid aan baaritaan lagu heleyin. Sidaa ayuuna aydhiskii ku noqon mid aan la isu gudbin karin.
- Daawada oo si sax ah loo qaato, waxay u ogolaaneysaa qofka aydhiska xambaarsan inuu gaaro marxalad aan awood feeyrasedka aan baaritaan lagu heli kareeyin oo sidaana uusan dib dambe qofna ugu gudbin aydis. Haddii daawada dhaqso loo qaato marka uu infekshinka dhoco, taas waxay ogolaanaysaa in tayada nolosha ay habboonaato iyo in la helo cimri dherer midki caadiga ahaa.
- Sidaa awadeed waxaa aad muhiim u ah in la is baaro si loo ogaado darajada cudurka aad xambaarsanaan karto iyo haddii ay lama huraan noqoto in daaweyn lagugu billaabo sida ugu dhaqsaha badan kadibna aad u noqoto ruux cudurkiisa aan baaritaan lagu heli karin.



## Awoodda feeyraseed ee aan baaris lagu heli kerin

- Awoodda feeyraseed waxay tahay tirada feeyras ee laga heli karo dhiigga iyo qoyaannada galma.
- Daaweyntu waxay feeyraska ka hor is-tageysaa inuu is kordhiyo.
- Hadba inta awoodda feeyraseed ay dacif tahay, ayuu qofkuna faafinta cudurkiisa u yaraaneysaa. Haddii awoodda feeyraseed ey weynatana, faafintii cudurka wey weynan.
- Awoodda feeyraska waxaa lagu sheegaa iney tahay mid aan baaris lagu arki karin (daawada fadligeeda) goorta ay dhab ahaan isu dhinto ay gaarto heer aan xi-taa cudurki aydhiska laga heli kareeyin dhiigga. Qofkii weli wuxuu yahay qof aydhiska xambaarsan laakin aan dadka u sii gudbin karin. Waa haddii si joogto ah caafimaadkaaga loola socdo adigoo si fiicanna daawadii u qaadanaya, marka ay awoodda feeyraseed noqoneysa mid aan baaris lagu arki karin (3 ilaa 6 bilood ayaana loo baahan yahay).
- Heerka aan baaris lagu heli karin cudurkan = heerka ama darajada aan la isku gudbin karin, waxay kaa babaadineysaa oo keli ah aydhiska ee laakin cudurrada kale ee galma lagu kala qaado kuma jiraan kuwaa waa goonigood.

i = i

## Sidee la isugu gudbiyaa aydhiska?

Aydhiska wuxuu galaa dhiigga, shahwada, dhareerka ka soo horreeya shahwada inteysan imaanin, xuubka saaran tuubada dabada, qoyaanka siilka iyo caanaha hooyada.

## Aydhiska waxaa la isugu gudbiyaa

- Marka galmo siilka ah la isla sameeyo, ama dabada ama/ iyo afka ayada oo wax is-badbaadin ah aan la adeegsanin;
- Cirbadaha oo la isla wadaago, waxyabaha wax sara ama jara ama adeegsiga qalabka la isku duro ayada oo aan laga dilin jeermiska;
- Hooyada xambaarsan aydhiska oo u gudbisa ilmaheeda wakhtiga foosha, intuu uurka ku jiro iyo intay naaska nuujineyso. Laakin haddii hooyada si fiican loola socdo caafimaadkeeda oo ay daawooyinkeedana si fiican u qaadanayso, ilmaheedu waxay dhalan doonaan ayaga oo aan xambaarsaneyn cudurka aydhiska.



## Aydhiska la isuguma gudbiyo sidan :

- Shumiska, qufaca, hindhisada, candhuufta, illinta ;
- Salaanta gacan is gelinta ama hab isa siinta ;
- Maacuunta oo la wadaago, siriirta, musqusha iyo baraakta qubeyska ;
- Qaniinyada cayayaanka.

## Sidee looga badbaadaa ?

Adigoo kaashanaya ka-hortagga isku dhafan:



**Adeegsiga bambuurada ama kondomka** tan ragga ama tan haweenka (yo labenta biyaha ka sameyan ee wax sibibxiya haddii ay lama huraan noqoto) si eysan kuu taaban ama kuu soo gaarin :

- Qoyaanka jirka ka yimaadda ee cudurka kuu gudbin kara;
- Maqaarka buka ama ay wax-yeeleeyeen infekshinnada kale ee galma lagu kala qaado.



## Baaritaanka

Ururrada qaar kuwooda sameeya baaritaan deg-deg ah (dhibic dhiig ah oo laga qado farta caaraddeeda hore), muddo 3 bilood gudahood laga billaabo markaad khatarta la kulantay.

Rugta dhakhtarka, rugta qorsheynta qoysaska, aqal ka mid ah aqallada daaweynta ama isbitaallada si laguugu sameeyo dhiig qaadis caadi ah muddo 6 isbuuc gudahood laga billaabo markaad khatarta la kulantay.



## Daweynta

**PrEP :** «daweyntan waxaa loo soo jeediyaa qof aan xambaarsaneyn cudurka aydhiska ka hor inta uusan khatarta gelin si aysan u dhicin in aydhisa is qaadsiiyo (kaa badbaadin meyso infekshinyada kale ee galmaada lagu kala qaado).

**TPE :** waa daweyn deg-deg ah taas oo ogolaaneysa in la dhimo khatarta u gudbinta aydhiska qof aan aydhiska xambaarsaneyn. Daawadan waa in la billaabaa sida ugu dhakhsaha badan, ugu badnaan 72 saacadood gudahood laga billaabo markii uu qofku khatarta galay. Waxaa la bixiyaa daawadan haddii khatar weyn ay dhacday oo keli ah oo infekshin ah, waxaana bixiya dhakhtarka rugta aad ku xiran tahay.

## Xiriirada

### Namur : SASER

<https://pointsrelaissida.jimdo.com> - 081/77.68.20

### Liège : Sidasol

[www.sidasol.be](http://www.sidasol.be) - 04/287.67.00

### Charleroi : Sida-IST Charleroi-Mons

[www.sida-charleroimons.be](http://www.sida-charleroimons.be) - 071/92.54.10

### Zanzu

[https://www.zanzu.be/fr/](http://www.zanzu.be/fr/)

Si aad u hesho rug baritaaneed oo kuu dhow, booqo websaaydkan  
[www.cool-and-safe.org](http://www.cool-and-safe.org)

Éd. Resp. : Thierry Martin, Plateforme Prévention Sida  
 Place de la Vieille Halle aux Blés 28/29 - 1000 Bruxelles

Ama aan ahaanno waalidiin, ama kuwa nolosha isla wadaagaya, ama xubno ka mid ah bulshada, ama mas'uuliyiin diinta ku dheer, gebigeenna waxaynu leenahay dowr aan ka cayaarno ka hortagga aydhiska, waa mas'uuliyad gebigeenna ina saaran.



Kondomka



Baritaanka



Daweynta

### Plateforme Prévention Sida

Place de la Vieille Halle aux blés 29/28

1000 Bruxelles

Tél: 02/733.72.99

[WWW.COOL-AND-SAFE.ORG](http://WWW.COOL-AND-SAFE.ORG)



Cool and Safe



**Ma ogtahay?**